

Waxa aad u Baahan tahay Inaad Ogaato

Haddii aad tahay waalid leh ilmo ay dhib ku tahay inuu barto akhrinta, waxaad u baahan tahay inaad ogaato Ballanqaadka Akhrinta Fasalka Saddexaad ee Ohio.

Ballanqaadku wuxuu leeyahay in iskuulka cunuggaagu uu xaqiijiyo sida uu wax u akhriin karo bilowga sanad dugsiyeed walba laga soo bilaabo xannaanada ilaa fasalka 3-aad. Haddii wiilkaaga ama gabadhaadu aysan sidii la rabay wax u akhriin karin, iskuulku waa inuu sameeyo qorshe ilmahaaga ka caawiya inuu horumar sameeyo.

Samaynta qorshahan qayb ayaad ka qaadanaysaa. Qorshuhu wuxuu sharaxaya caawinaadda uu cunuggaagu heli doono si uu u gaaro ama ay u gaarto heerkii akhrinta laga rabay. Haddii uusan cunuggaagu wali wax u akhriin karin sidii laga filayay dhammaadka fasalka saddexaad, waa in iskuulku uu cunuggaaga ku reebo fasalka saddexaad marka iskuulku sanadka xiga bilowdo. Waxaa jira marar laga cafinayo:

- Haddii uu cunuggaagu ku hadalka Ingiriiska baranayo;
- Haddii uu cunuggaagu dhigto Barnaamij Waxbarasho oo u Gaar ah (IEP) oo IEP uu sheegayo in aan lagu celin karin fasalka saddexaad akhrinta dartiis;
- Haddii cunuggaagu ugu yaraan laba sano helay caawinaadda akhrinta oo uu wali keeno ama ay keento heerkii hore;
- Haddii cunuggaagu uu muujiyo imtixaanada qaar, oo aan ahayn imtixaanka waddanka, inuu heerkii fasalka uu wax ku akhriinayo.

Si aad u ogaato in cunuggaagu u qalmo ka cafinta la soo sheegay, la hadal macallinkiisa ama macallinkeeda.

Cunuggaagu wuxuu heli doonaa fursado badan oo uu ku muujiyo ama ay ku muujiso inay horumarayso wax akhrintiisu. Waa muhiim inaad la xiriirto macallinka cunuggaaga si aad ula socoto meesha ay wax marayaan.

Si lagaaga caawiyo waxa aad filii karto, riix [halkan](#), ama booqo education.ohio.gov ooku qor ballanqaadka akhrinta fasalka saddexaad meesha raadinta. Waxaad helayaa Tilmaamaha Waaliddiinta (Parent Roadmaps) ee Ballanqaadka Akhrinta Fasalka Saddexaad oo aad tixraaci karto marwalba oo aad su'aal qabto.

